# HORUMARINTA KALA-GUURKA TAMARTA NADIIFKA AH




## QORSHAHA TAMARTA EE UPPER MIDWEST

Xcel Energy®

Bishii Febraayo 2024, Xcel Energy waxay soo jeedisay Qorshaha Tamarta Upper Midwest ee cusub kaasi oo sii wadi doona hammigeena yaraynta kaarboonka iyadoo la hubinayo in macaamiishu sii helaan adeegga korontada oo la isku hallayn karo, ammaan ah, oo qiimo jaban oo ay ku tiirsanaan karaan.

Soo-jeedintu waxay ku dhisan tahay qorshayaasheena horey loo ansixiyey ee xiritaanka dhammaan warshadaha dhuxusha ku shaqeeya ugu dambayn 2030 iyo in aanu ku baddalno tamarta la cusboonaysiin karo sida dabaysha iyo qorraxda, oo lagu kabay khayraadka soo-saaridda korontada ee "had iyo jeer la heli karo" si aanu u hubino inuu noqdo mid la isku hallayn karo. Nidaamkeena Upper Midwest wuxuu bixiyaa tamar nadiif ah oo sii kordhaysa oo aanu siino dhammaan gobolada aanu u adeegno ee ku yaala mandaqadda—Minnesota, Wisconsin, North Dakota, South Dakota iyo Michigan.




*Dhimista siideynta qiiqa kaarboonka ee ka dhasha korontada la siiyo macaamiisha Upper Midwest ilaa 2005-2022 iyo dhimista kaarboonka ee la qaabeeyey ee 2030 sida uu dhigayo Qorshaha Tamarta Upper Midwest.

### Sii xoojinta hoggaaminta tamarta nadiifka ah

Qorshaha la soo jeediyay ee cusub:

- Wuxuu siinayaa adeeg koronto oo nadiif ah oo la isku hallayn karo macaamiisha mar kastoo aanu soo kordhino tamarta la cusboonasiiyo oo dheeraad ah, iyadoo dhimista siideynta qiiqa kaarboonka la filayo inuu ka bato 80% ugu dambayn 2030, marka la barbardhigo heerarkii 2005-kii, iyadoo laga yaabo inay dhimistu gaarto 88%.
- Wuxuu taageerayaa kala-guurkeena si aanu si buuxda uga baxno isticmaalka dhuxusha ugu dambayn 2030.
- Wuxuu si mas'uuliyad ku dhisan u gaarayaa yoolasha yaraynta kaarboonka iyo kordhinta tamarta la cusboonaysiin karo ee goboladeena Upper Midwest, iyadoo in ka badan 80% korontada macaamiisheenu hesho la saadaalinayo inay ka timaado ilo bilaa kaarboon ah ugu dambayn 2030.
- Waxaa lagu maalgalinayaa canshuur dhimis lagu qiyaasayo $5.7 bilyan oo loogu talagalay khayraadka tamarta la cusboonaysiin karo ee cusub taasi oo ka imaanaysa Xeerka Dhimista Sicir Bararka.
- Wuxuu sii dhimayaa kharashka macaamiisha laga qaado, iyadoo celceliska kororka sannadlaha ee la qiyaasay ee sicirka korontada macaamiishu uu ka yar yahay 1% — waa in ka yar kala-bar celceliska kororka ka jira dalka oo dhan ee la filayo ee qiimaha koronto oo dhan.
- Wuxuu daboolayaa baahiyaha tamarta ee macaamiisheena maadaama isticmaalka korontada ee ka jirta mandaqadda la filayo inay si aad ah u korodho sannadaha soo socda.

### Qoddobada Ku Jira Qorshaheena



**Xirista warshadaha dhuxusha**
Xiritaanka warshadaheena dhuxusha ee ugu dambeeya ee ku yaala Upper Midwest ugu dambayn 2030

**Soo kordhinta tamarta la cusboonaysiin karo**
Dhisidda xarumo qiyaastii soo saara 3,600 megawaat oo ah tamarta laga dhaliyo dabaysha iyo qorraxda, iyo waliba beytariga tamarta keydiiya oo 600 megawaat ah ugu dambayn 2030


**Sii wadista nukliyeerka bilaa kaarboonka ah**
Kordhinta isticmaalka warshadaheena nukliyeerka bilaa kaarboonka ah ilaa horraanta 2050-ka

**Xoojinta mustaqbal bilaa kaarboon ah**
Sii wadista isticmaalka xarumaha tamarta ee gaaska dabiiciga ah si aanu u hubino isku-hallaynta iyo negaadiga nidaamka korontada iyadoo aanu dhinaca kale sahaminayno ilo tamar oo "had iyo jeer la heli karo" si aanu u horumarino kala-guurka tamarta nadiifinka ah

## QORSHAHA TAMARTA EE UPPER MIDWEST


Iyadoo la ayidayo dhimistan kaarboonka ee waddanku horseedka u yahay, qorshuhu wuxuu soo jeedinayaa inuu soo kordhiyo tamarta laga dhaliyo dabaysha iyo qorraxda oo dheeraad ah, inuu kordhiyo isticmaalka warshadaha nukliyeerka ee bilaa kaarboonka ah ilaa horraanta 2050-ka, inuu kordhiyo nidaamyada beytariyada keydiya tamarta, iyo in la soo kordhiyo mugga ilaha laga soo saaro tamarta oo "had iyo jeer la heli karo" oo cusub, sida gaasta dabiiciga ah, si ay u baddalaan tamarta laga dhaliyo dabaysha iyo qorraxda markii loo baahdo. Waxaanu sidoo kale sii xoojin doonaa guusha aanu ka gaarnay barnaamijyada tashiilidda tamarta iyo ka jawaab-celinta dalabka oo ka caawin doona macaamiisha inay tamarta dhaqaalaystaan oo lacag uga soo harto iyadoo la dhimayo isticmaalka tamarta iyo culayska saaran xarkaha/bustanka korontada.

### Isku Darka Ilaha Tamarta Macaamiisheena




Hammigeena gaarista dhimitaanadan waawayn ee siideynta qiiqa kaarboonka, annagoo dhinaca kale joogtaynayna bixinta adeeg la isku hallayn karo, ammaan ah oo qiimo jaban, waa u muhiim siyaasad-dejiyeyaasha, daneeyeyaasha, bulshooyinka, macaamiisheena iyo shaqaalaheena. Waxaanu rajaynaynaa inaanu sii wadno in aan si wadajir ah ula sii shaqayno daneeyeyaashan muhiimka ah inta soo jeedinteenu ay hor taalo nidaamiyeyaasha tamarta.

### Siideynta Qiiqa Kaarboonka ee La Filayo




xcelenergy.com | © 2024 Xcel Energy Inc. | Xcel Energy is a registered trademark of Xcel Energy Inc. | 24-05-503